


Qalliinka caloosha iyo mindhicirka oo lagu sameeyay suuxdin guud: Carruurta (44 ilaa 88 kiilo)

Colonoscopy with General Anesthesia: Children (44 to 88 Pounds) (Somali)

Qalliinka xiidanku beerka waxaa loo isticmaalaa in lagu eego xiidanka oo dhan(sawirka 1). Dhakhtarka ilmahaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadku wuxuu isticmaali doonaa tuubbo yar oo laaban (dabacsan) oo la yiraahdo oo la yiraahdo tijaabo lagu hubiyo gudaha jidhkaaga si loo eego casaan, barar, dhiigbax, boogaha, ama caabuqyada.

Ka hor Habraaca

- Laga bilaabo 1 usbuuc ka hor baaritaanka, jooji dhammaan kuwa aan steroid ahayn daawooyinka ka hortagga bararka (NSAIDs), sida:
 - Asbiriin
 - Celebrex-ke®
 - Ibuprofen (Motrin® and Advil®)
 - Naproxen (Aleve®)
- Haddii uu cunuggu qaato daawada feero ah, maqaadan **karaan** maalinta ka horreysa qalinka.



Sawirka 1 xiidanku waxa uu ku yaalaa aagga caloosha.

- Kalkaalisada ayaa ku soo wici doonta si ay su'aalo kaaga waydiiso caafimaad ee cunugaaga.
- Kalkaalisada waxay kuu sheegi doontaa xiliga ay tahay inaad cunugaaga ka joojiso cuntada iyo cabitaanada, marka aad isbitaalka keeneyso iyo waqtiga qaliinka.
- Ilmahaaga ha u oggolaan in uu cuno caano-caano, cabitaanada qufaca, ama nacnac adag. Haddii cunugaagu uu soo calaashaday xanjo, waxaa qaliinka dib loo dhigi doonaa 2 saacadood laga bilaabo wakhtiga uu xanjada tufay. Haddii la liqay xanjada, qaliinka waxaa dib loo dhigi doonaa 8 saacadood laga bilaabo xiligii uu xanjada laqay.

Diyaarinta saxaarada

Ilmahaagu waa inuu sameeyaa u diyaargarowga saxarada maalin ka hor qalinka. Waxay qaadan doonaan daawooyin fudud si ay u nadiifiyaan saxarada caloosha iyo mindhicirka.

- Cunuggu wuxuu ka maqnaanayaa iskuulka maalinta ladiyarinayo saxarada iyo maalinta qaliinka.
- Waxaad farmashiyaha kasta ka heli kartaa dawooyinka caloosha jilcisa adigoon warqad dhakhtar qorin.
- Ilmahaadu waxay u badan tahay inuu saxaarodo. Saxarkoodu wuxuu noqon doonaa mid dabacsan oo biyo leh jaale ama cagaar.

Saacadaha shaqada kadib, iskuduwaha isbitaalka ka wac (614) 722-2000 kadibna waydii dhakhtarka qaabilsan GI oo deegaanka oo shaqada kujira.

Tilmaamaha gaarka ah ee diyaarinta xiidmaha — Maalinta ka horeysa qaliinka

- Marka (maalinta) _____ (tariikhda) _____, ilmahaagu waa in uu cunaa cunto dareere ah oo saafi ah laga bilaabo subaxdii ilaa uu qaliinku dhamaado.
 - Ma **cuni karaan cunto, caano, iyo caanaha**. Cunista waxay u horseedi doontaa saxaro cusub oo xiidmaha. Taas macnaheedu waa in la joojin karo howsha.
 - Dareeraha saafiga ah waa inaad si fudud wax uga dhex arki karto. Waa inaanay dareeraha ku dhex jirin waxyaabo yaryar oo la arki karayo ama ishu qabanayso.

Ilmahaagu wuxuu u qaadanayaa daawooyinkan sida lafarey:

- **Miralax®** (polyethylene glycol 3350)
 - Isticmaal **119 garaam(7 kaabsool)**, oo lagu buuxiyey xariiqda qiyaasta gudaha kaabsoolka.
 - Ku qas **32 wiqiyadood** oo dareere kasta oo saafi ah.

- Ku bilow cabitaanka isku darka **10ka subaxnimo.**, iyo ku dhammeeyna **3 ilaa 4 saacadood gudahood.**

- **Bisacodyl (Dulcolax®)**

- Qaado hal kiniin oo ah 5 milligram (mg) saacada 11 subaxnimo **iyoo** hal kiniin oo ah 5 mg saacada 2 galabnimo.

*(Waa daawooyin aan dhakhtar kuu qorin. Waxaad ka heli kartaa **adigoon** warqad dhakhtar kuu qorin farmasiyada ama dukaamada raashinka.)*

Ka dib marka la dhammeeyo diyaarinta xiidmaha

- Ilmahaagu waxa uu cabbi karaa cabitaan saafi ah ilaa 12ka subaxnimo (saqda dhexe).
- Kalkaalisada caafimaadka ayaa kula soo xiriiri doonta si ay kuu siiso tilmaamaha kale ee qaliinka ka hor iyo waqtiga aad ku imaaneyso.
- Haddii aad qabto su'aalo ama walaac ku saabsan ilmahaaga, wac Khadka Kala-soocida Kalkaaliyaha GI **(614) 722-3445**.

Sida Loo Qabto Baadhitaanka

- Waalidka ama qofka masuul ka ah waa in uu goobta joogo si uu u siiyo macluumaadka la xiriira caafimaadka ilmaha uuna u saxiixo foomka ogolaanshaha. Haddii aysan imaan karin, wac waaxda GI si aad u sameyso qorshe kale.
- Ilmahaaga waxaad u diiwaangelinaysaa sida lagu sheegay. Kalkaaliyayaasha ayaa ka hadli doona qaliinka ilmahaaga iyo wixii cabasho oo khuseya caafimaadka.
- Ilmahaada waxaa dib loogu soo celin doonaa qaliin inta aad ku sugeysid qolka sugitaanka. Qolka qaliinka waxaa lagu siinayaa dawooyin kaa caawinaya hurdada (dawada hurdada).
- Qalabka mindhicirka waxa la gelin doonaa godka hoose ee ilmahaaga (malawadka). Dhaqtarka ama daryeel bixiyaha caafimaadka ayaa dulmarayo hormarkooda.
- Qaybo yaryar oo unugyo ah (unugo yar) ayaa laga yaabaa in la qaado si loo baadho.

Ka dib Qalliinka

- Ilmahaaga waxaa loo qaadi doonaa qolka soo kabashada si uu u soo tooso.
- Dhakhtarka ama daryeel bixiyaha ayaa kaala hadli doona daawooyinka la isticmaali doono.
- Waxaa laga yaabaa in ilmahaagu qabo baahiyo gaar ah. Marka ay si fiican u xakameeyaan dareeraha, waxay cuni karaan cunto.

- Waxaa laga yaabaa in uu cunugaagu u baahdo in lagaa caawiyo socodka iyo in uu gaaro gaariga.
- Ilmahaaga waxaa laga yaabaa inuu ku dhaco xanuun caloosha ah baaritaanka kadib. Tani waa sida gaaska caadiga ah. Waxay kaloo noqon karaan lallabbo.
- Dhakhtarka ama bixiyaha daryeelka caafimaadka ayaa kuu sheegi doona waqtiga uu cunugaagu dib ugu laaban karo hawlihiisa caadiga ah.

Khataraha

- **Dhiigbax** – Ilmahaaga waxaa laga yaabaa inuu dhiig ku jiro candhuuftiisa. Inta badan waa qadar yar oo waqti gaaban ah. Tani waxay noqon kartaa mid khatar ah haddii ay qabaan xanuun dhiig-baxa.
- **Daloolka** – Kani waa god ku yaalla(mandhaciir) marinka cuntada laga cuno ama malawadka. Waa wax aad dhif u ah. Qalliin ayaa loo baahan karaa si loo hagaajiyo.
- **Nfekshannada** – Haddii ilmahaagu ay dhibaato ka haysato wadnahooda ama habka difaaca jidhka, waxay halis ugu jiraan infekshannada. Cudurka waxaa lagu daweyn karaa antibiyootiko.

Goorta ay tahay in la Waco Dhakhtarka

Soo wac dhaqtarka canugaaga ama daryeel bixiyaha caafimaadka haddii ay qabaan:

- Dhiig ka yimaada marinka danbe 1 ama 2 maalmood ka dib qaliinka.
- Xanuun degdeg ah, oo caloosha ku dhaca.
- Qandho ka sarreysa 101° Fahrenheit (F) ama 38.3° Celsius (C).
- Mataqid (matag).

Lasocodka

Waxaad heli doontaa wicitaan haddii qorshaha daryeelka ilmahaaga loo baahan yahay in la beddelo. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, waydii dhakhtarka cunugaaga ama daryeel bixiyaha caafimaadka.